SOO BANDHIGGA GARGAARKA KIRADA (RAD)
OGEYSIISKA MACLUUMAADKA EE DEGANAYAASHA (RIN)

7/25/18

Fadlan ka asoo qeybgal kulan looga hadlayo qorshsda MPHA ay dooneyso in ay ku dhameystirto dib u dhis balaaran oo lagus ameynayo Elliot Twins iyo u bedelidda maalgelinta dhismayaasha ee barnaamijka Soo Bandhigga Gargaarka Kirada (RAD).

Kulanka 1aad: Arbaco, 8da Agoosto; 5:00-6:30 galabnimo (waa in aad timaadaan 4:30 galabnimo si aad isu diiwaan gelisaan)
Kulanka 2aad: Talaado, 9ka Agoosto; 02:00-3:30 galabnimo (waa in aad timaadaan 01:30 duhurnimo si aad isu diiwaan gelisaan)

Goobta: Bethlehem Baptist Church (Dhismaha Kaniisadda)
720 13th Ave S., Minneapolis (Hal looto u jirta Elliot Twins)

MPHA ayaa idiin diyaarisay turjubaano Afka Soomaaliga ku hadla.

Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo xagga luqadda ama baahi kale oo aad qabto oo la xiriirto naafanimo kuu gaar ah, la soo xiriir khadka Telefoonka gargaarka ee MPHA ee 612-342-1200.

Wargelintan waxaa laguugu faahfaahinayaa xuquuqda aad leedahay sida uu dhigayo RAD iyo sida u wareegidda RAD ay saameyn kuugu yeelan karto.

English
This information is important. If you do not understand it, please call your MPHA representative for free language assistance.

Hmong
Yog koj tsi to taub txog cov nqi lust seem ceeb no, thov hu mus rau ntawm tsev luam qhov chaw ua hauj lwm MPHA peb yuav pab ntxhais rau nej.

Somali
Halkan waxaa ku qoran war ama akhbaar aad u muhim ah, haddii aad fahmi kari weydo, fadlan ula tag wakiilka hay'adda MPHA, si aad tarjumaad bilaash ah uga hesho.

Oromo
Beeksifni kun hedduu barbaachisaa dha. Yaadni isaa hoo isiniif hin galle ta'e, bakka bu'aa "MPHA" (Bulchiinsa Mana Mootummaa Magaalaa Minneapolis) akka afaan isiniif hiikamu gargaarsa tolaa gaafadhaa.

Amharic (Ethiopian)
ይህ መረጃ በጣም አስፈላጊ ነው። ምን እንደሚል የማይገባዎ ከሆነ፣ ከየ MPHA (የሚኒያፖሊስ የመንግስት የመኖሪያ ቤቶች ባለስልጣን) ወኪል ጋር ተገናኝተው በነጻ የሚሰጥ የቋንቋ[ማስተርጎም] እርዳታ እንዲሰጥዎ ይጠይቁ።

Laotian
ຖ້າຫາກວ່າທ່ານບໍ່ເຂົ້າໃຈໃນຂໍ້ຄວາມສໍາຄັນນີ້, ທ່ານຕ້ອງໂທໄປຫາທີ່ ຫ້ອງການເຂືອນຫລວງ MPHA ຜວກເຮົາຈະຊ່ວຍອະທິບາຍໃຫ້ທ່ານ.

Spanish
Esta información es importante, si usted no lo entienda, por favor póngase en contacto con MPHA para asistencia lingüística gratuita.

FURSADAHA GURYAHA IYO SHAQADA OO LOO SIMAN YAHAY

Wax isbedel ah kuma imanayo gargaarka kirada!
Cidna lagama saarayo Elliot Twins.

Maxay MPHA u codsaneysaa RAD?

RAD waa barnaamij aan khasab aheyn oo ay maamusho Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Mareykanka (HUD). Sida uu dhigayo RAD, HUD waxa ay wax ay gargaarka kirada ee guryaha dadweynaha u badeleysaa heshiiska kirada mudada dheer ah ee Section 8. **"U wareejinta" guryaha ee RAD waxa ay MPHA u suurto gelineysaa iney hesho lacag ay ku dayactirto oo ku horumariso guryaha, xilligan la joogo iyo mustaqbalka.**

Maxaa lagu dooray Elliot Twins?

Elliot Twins waa ka mid ah dhismayaasha ugu da'da weyn daaraha dhaadheer ee MPHA. Iyadoo la dhisay 1961. Waxa ay u baahan yihiin dayactir iyo dib u habeyn balaaran. Elliot Twins waa mid la doonayo in ay l**a jaanqaado casriyeynta nolosha ee deganayaasha iyo** waxyaabaha dheeraadka ah ee deganayaashu u baahan yihiin. MPHA waxa ay si gaar ah u qiimeyneysaa sid ay Elliot Twins u noqon laheyd mid dadku awoodi karo. RAD ayaan u adeegsaneynaa in ay guryaha u dayactiraan dadka iminka deggan ee ku nool halkaas.

Maxaya tahay shaqada la qabanayo?

Ma fileyno in tirada qolalka iyo qaabka dhismaha wax isbedel ah lagu sameeyo. Ujeedada laga leeyahay u wareejinta RAD **waa in guryaha lagu sameeyo dayactir si ay u noqdaan kuwa aad ku noolaan kartaan mudada dheer**. Dib u habeynta lagu sameynayo waxaa ka mid noqon kara:

- Dib u cusbooneysiinta guryaha (jikada, musqulaha, qaanadaha alaabada lagu rito, inta la dhameytiray, iwm.)
- Casriyeynta korontada, tuubooyinka biyaha, dabdamiska iyo habka makiinadaha.
- Heerka beekhaaminta tamarta.
- Daaqado cusub, saqaf iyo dibadda kore ee dhismaha.
- Goobaha bulshada isugu timaado oo la casriyeenayo
- Xoojinta nidaamka amaanka dhisamaha

RAD waxa ay ka dhigan tahay dib u habeyn balaaran oo lagu smeeyo qolalka la degan yahay iyo goobaha dadweynaha u dhaxeeya, si guryaha loo deganaan karo mudada dheer.

Waxaanu idinka rajeyneynaa in aad kulanka ka soo qeyb gashaan si aad u ogaataan dariiqada ugu wanaagsan ee naqshadeynta qolalka iyo goobaha u dhaxeeya dadweynaha iyo waxyaabaha dheeraadka ah ee aad jeceshihiin in guryaha lagu kordhiyo ee goobaha dadweynaha u dhaxeeya iyo dhulka cagaraan.

Miyaa la iga doonayaa in aan guuro?

Barnaamijka RAD ma ogola in dadka si aan soo noqon laheyn guryahooda looga raro iyaga oo aan dooran sidaas. Ma jirto cid laga saarayo Elliot Twins. Hawshani waxa ay la mid noqoneysaa dib u habeynta ay MPHA ku sameyso guryaheeda. Waxaa laga yaabaa in aad si ku meel gaar ah uga guurto gurigaaga inta laga shaqeynayo. Haddii ay HUD ogolaato codsiga RAD ee MPHA, in hawsha la bilaabo waxa ay qaadneysaa bilo far badan ama xitaa sanad ama ka badan.

Haddii loo baahdo inaad si ku meel gaar ah u guurto inta dib u habeyntu socoto, xuquuq ayaad leedahaya sida uu dhigayo sharciyada RAD, oo ay ka mid tahay in lagu siiyo ogeysiin qoraal ah iyo faahfaahin ku saabsan guuritaanka. Waxaa kale oo aad xaq u leedahay adeegga la talinta, iyo gargaarka guuritaanka oo gebi ahaanba ay bixineyso MPHA, iyo kharashyo kale.

> Haddii loo baahdo inaad si ku meel gaar ah u guurto inta dib u habeyntu socoto, waxaa laguu damaanad qaadayaa inaad xaq u leedahay inaad gurigaaga ku soo noqoto.

Sida uu dhigayo RAD, waxaa laguu **damaanad qaadayaa inaad xaq u leedahay inaad gurigaaga ku soo noqoto** mana la sameyn doono **dib u qiimeyn cusub oo ah in aad shuruudaha ka soo baxday iyo in kale.**

U wareejinta RAD, iyo guuritaanka la xiriira, waa in loo dhaqan geliyaa sida ay dhigayaan sharciyada u sinaashaha guryaha iyo xuquuqda madaniga ah, waxaana la idin siinayaa meelaha aad la xiriiri kartaan oo idinka caawinaya baahidiina gaarka ah ee waxyaabaha la xiriira naafanimada. Inta uu socdo nidaamkan, haddii aad is leedahay xuquqdaada ayaa lagu xad gudbay, waxa aad la soo xiriir kartaa Mathew Jason ee xafiiska HUD ee Minneapolis ee telefoonka 612-370-3040.

Kirada aan bixiyo miyey kordheysaa?

Qiyaastii inta badan dadka deggan Elliot Twins, jawaabtu waa "maya." Kirada waa mid ku go'an 30 boqolkiiba dakhliga qofka soo gala. Qoysaska laga yaabo in wax yar ay kirada ay bixiyaan kor u kacdo waa qoyasaska bixiya kirada go'an (waxa ay HUD ugu yeerto kirada ugu sareysa). Haddii ay kirada qoysku bixiyo kor u kacdo 10% (ama wax ka badan $25), mudada kirada ayaa loo qeybinayaa.

> Sida ay dhigayaan sharciyada RAD, kirada sidoo hore kale ayaa loo xisaabaa: 30 boqolkiiba dakhliga qofka soo gala.

Yey la kaashaneysaa MPHA?

MPHA ayaa u xilsaaran hawsha dib u habeynta. **MPHA ayaa sii maamuleysa Elliot Twins.** Waxaa aan la shaqeyneyn doonaa xubnaha bulshada si aan maalgelin ugu helno hawshan. Maalgelinta waxaa ka mid ah deyn, deeq, maalgelin ka imaneysa degmada/magaalada, Canshuur Dhaafka Guryaha Dakhligoodu hooseeyo (LIHTC), maalgelin, iyo beekhaaminta tamarta ee ka dhalaneysa dib u casriyeynta. Waxaa kale oo aan la shaqeyn doonaa naqshadeeyayaal iyo shirkadaha dhismaha.

Heshiiska kirada ee aan gelayo ma ilaalinaya xuquuqda aan leeyahay?

Haa. Marka guriga la wareejiyo, waxa aad saxiixeysaa heshiis cusub oo kirada ah. Heshiiska waxa u uku siinayaa xuquuq la mid ah xuquuqda uu kuu ogol yahay kan aad haadda ku degan tahay, oo ay ka mid tahay **in aad cabasho soo gudbin karto** iyo mudada sharcigu ogol yahay in lagu wargeliyo haddii heshiiska laga baxayo. Waxaa sida oo kale aad xaq u leedihiin in aad is abaabushaan, hay'adaha ay degnayaashu maamulaan laga siinayaa $25 qolkii la degan yahayba, sanadkii.

RAD waxba kama bedeleyso xuquuqda degnayaasha, oo ay ka mid tahay habka cabasho soo gudbinta iyo ka qeybgalka gudiga maamulka.

Mala hubaa inuu dhacayo wareejinta RAD?

Maya, waa in ay HUD ogolaato codsiga MPHA ka dibna laga shaqeeyaa qorshe maaliyadeed oo lagu maalgeliyo dayactirka dhismaha. **Haddii aan ka qeyb qaadano RAD iyo hadii kalaba, gargaarkaaga kirada waxba iskama bedelayaan.** Haddii aanu suuro gelin u wareegidda RAD ee Elliot Twins, waanu sii wadeynaa dayactirka iyo taageerada guryaha waxaanana raadin doonaa fursado kale oo aan ku xaqiijino jiritaanka guryaha dadka dakhligoodu hooseeyo ee mudada dheer.

* * *

Waxaa laga yaabaa in qorshaha MPHA isbedelo markii aynu sameyno baaritaan dheeraad ahba, oo ay ka mid tahay ururinta ra'yiga iyo daraasad ku sameynta baahida guryaha iyo fursadaha maaliyadeed. Waxaanu kulan u qabaneynaa deganayaasha guryaha si loola wadaago fikradaha iyada oo lala socodsiiyo isbedelka soo kordha mar kasta. Maadaama aad aqoon wanaagsan u leedihiin guryaha, waxaanu idinka codsaneynaa in aad nala wadagataan fikrada aad qabtaan iyo dayactirka loo baahan yahay.

Haddii aad go'aansato inaad guurto inta aan RAD loo wareejin: Waad guuri kartaan adinka oo eeegaya baahida qoyskiina iyo hadafkiina gaarka ah. Hase yeeshee, haddii aad iskaa u guurto adiga oo aan lagu farin inaad guurto, waxaa suurogal ah in aad weyso xaqa aad u leedahay in lagaa bixiyo kharashka guuritaanka iyo gargaarka sida uu dhigayo RAD. Haddii aad maanka ku heyso inaad guurto, kala soco maamulaha guriga xogtii ugu dambeysay ee nidaamka RAD.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo RAD ku saabsan, soo booqo bogga RAD!

Macluumaadka RAD ee Deganayaasha
https://www.hud.gov/RAD/residents

Daraasado ku saabsan sida RAD uga hirgalay magaalooyinka kale:
https://www.hud.gov/RAD/news/case-studies

Akhri Ogeysiiska HUD ee qeexaya nidaamka RAD iyo xuquuqda deganayaasha
https://is.gd/RADNotice